

ISXILQAAN CONSTRUCTION COMPANY



FOR GENERAL CONSTRUCTION AND ENGINEERING

TEL:+252907796515 +252-907795855/ +252-90795506

Garowe Puntland state of Somalia

Email isxilqaancompany@gmail.com

Warsaxaafadeed jawaab celin ah

SABABTUU U JOOGSADAY MASHRUUCA WADADA ISKU XIRI LAHEYD JALAM IYO XARFO

GAROWE ONLINE waxay faafisay 22kii March Xog ay ku sheegtay in ay kasoo ururisay qoraalo sir ah oo lasoo gaarsiiyay iyo baaritaan iyadu sameysay.

Haddaba maxaa karun ah xogtaas? MISE XOG MA AHEYNE WAA BEEN ABUUR AY KOOXO DANAYSTAYAAL AH KASOO SHAQEEYEEN, KOOXO DANO GAAR AH LEH OO AAN DAL IYO DAD MIDNA WAX DAN AH KA LAHEYN?

Shirkadda ISXILQAAN CONSTRUCTION COMPANY oo iyadu kuguuleysatay tartankii mashruuca, haddana gacanta kuheysa dhismaha waddada ayaa soo diyaarisay warbixintan kooban si ay dadweynaha sharaftaleh ula wadaagto Xogta mashruuca. qoraalkii Garowe ONLINE iyo jawaabtii ICC waa sidan hoos kuqoran:

- Garowe ONLINE waxay sheegeen in ay gebi ahaanba joogsaday mashruucii JALAM-XARFO musuqmaasuq ay sameeyeen hay'adii dawladda iyo shirkaddii qaadatay qandaraaska.
- ICC-Dhismihii waddadu majoogsan, waana socotaa ilaa iyo hada. Sawirradii laga qaaday shaqada oo si habsami leh u socoto maalintii Garowe ONLINE - been abuurka ay soo qortay waxay kujiraan baraha bulshada oo laga eegi karaa.
- Garowe ONLINE - waxay qortay in Shirkadda Isxilqaan oo markii horeba aan guuleysan oo mashruuca eex lagusiiyey waxay kasoo bixiwayday qodobo muhiim ah oo ay markii hore ballanqaadeen.



- **ICC:** Isxilqaan tartankii waxay gashay No. 1, markii ay soo bandhigtay qalabkii ugu badnaa, khibraddii ugu badneyd iyo qiimihii ugu macquulsanaa. Waxaa sidaas iskuraacay guddigii qiimeynta oo isugu jiray Hay, addii mashruuca maalgelinaysay iyo masuuliyiintii kale ee ay Dawladda Puntland uwakiilatay Mashruucaas.
- **Garowe ONLINE** -waxay qortay in Hay'adda Jarmalka ah (GIZ) oo fulineysay mashruucan uu Midowga Yurub maalgeliyey ayaa waxaa lasoo gudboonaadey dhibaatooyin markii mashruucan la siiyey shirkadda Isxilqaan oo aan fulin Karin qodobbo muhiim ahaa oo lagu heshiiyey.
- **ICC-GIZ** iyada ayaa hoggaaminaysay tartanka iyo bixinta mashruuca, oo marti cidna ugama aheyn. Qodobbo muhiim ah oo la fulinwaayeyna ma jiraan ilaa iyo hadda.
- **Garowe ONLINE** -waxay ku sheegtay qoraalkeeda inay sameysay baaritaan buuxa, ayna xogtaas kaqaadatay dad xog ogaal ah oo magacyadooda diiday in la xuso.
- **ICC-Dadka** magacooda diiday in la xuso, wax caddeyn ahna aan keenin warbaahin mas'uul ah xog kamaqaadato. Mana ahan markii ugu horreysay ay **Garowe ONLINE** shacabka sharafta leh usoo gudbiso been abuur ay kumagacawday xog.
- **Garowe ONLINE**, waxay sheegtay in Shaqada mashruucu ka koobneyd 80km oo laami ah, 48 biyo mareen cusub (new culverts) iyo 80 biyo mareen hore u jiray oo la dayactirayo. Waxaa ilaa hadda la qabtay 20km oo carrobuuxis ah oo udhiganta 14.5% shaqadi la rabay.
- **ICC:** Shaqada la qabtayna 20km ma ahan, 20km 14.5% ma ahan. 80-ka km laamiga ah waxaakujirtay 20% oo u dhiganta 16km oo aan dib u dhis aheyn oo la dayactirayo. 64-ka km soo hartay oo dib loo dhisayo waxaa ilaahadda la dhameeyey 27km oo u dhiganta 42%.
- **Garowe ONLINE:** waxay qortay in Mudadii mashruucu uu ku ekaa December 2017ka, waxaa lagudaray shan bilood oo kale oo ku eg bisha May 2018, lacagta mashruucuna way dhacaysaa markii waqtigaas la gaaro.
- **ICC-** Muddada mashruucu waxay aheyd 42 bilood oo kabilaabatay December 2014. Muddadii asliga aheyd ayaa ku eg May 2018. Mudda dheeriya iyo mid dhicitaana oo naloo sheegey na majirto illaa iyo hadda.
- **Garowe ONLINE:** waxay sheegtay Murantaagan iyo dacwado socday oo hayadda GIZ ay u aragtay in hay'adaha dawladda ee u xilsaarnaa mashruucaas ay khalad ku difaacayaan shirkadda qandaraaska qaadatay.



- **ICC**-Hay'adda dawladda iyo shirkadda qandraaska qaadatay waxaa ka dhexeeya xiriir shaqo oo inta mashruucu socdo jiraya. GIZ waxay wakiil katahay midowgaYurub cidna marti ugama ahan mashruuca waana soo dhexgelilaheyd hadday aragto wax mashruuca dib u dhigikara.
- **Garowe ONLINE**: waxay sheegtay in Qodobada dhaliyey in shaqada soconwayday ay ka mid ahayd Ciid boorku ku badanyahay oo tayodeeda hooseyso iyo in qandraasluhu keenay makiinad khaldan oo samaysay jay jajaban
- **ICC**- Carro kaawada waddada la dhigay kulligeed waxay soomartay laboratory waxayna waafaqsantahay shuruudihii loo baahnaa makiinadda la keenayna waa kasarreysaa noocii mashruuca u qorneyd dhanka wax soosaarka iyo tayadaba.
- **Garowe ONLINE** - waxay sheegtay in Xubno ka tirsan dalladda engineerrada Puntland ay u xaqiijiyay in loo gutalogalay sharci ahaan in bil gudaheed laamiga la saaro.
- **ICC**- Mashruucu wuxuu leeyahay shuruudo kuqornaa qandaraaska oo shirkaddu ayna marna ka leexan karin, haddana kama leexan. Xubnaha dalladda engineerrada waxaa la gudboon in ayna is qarin oo haddii ay talo hayaan ama dhaliil shirkadda shaqada gacanta kuheysa usoo gudbiyaan iyagoo mahadsan. Waxaase iswaydiin mudan, xubnaha dalada injineerada magacyadood, xageesa daganyihiin.
- **Garowe ONLINE** -waxay shegtay in Qalabkii laamiga saari lahaa jidka aysan shirkaddu ku keenin waqtigii ay ballan qaadday.
- **ICC**- Qalabkii mashruuca loogu tala galay oo uu kamid yahay qalabkii laamiga waa soo gaaray waddanka wuxuu yaala goobta shaqada
- **Garowe ONLINE** -waxay shegtay in lagula heshiiyey qandaraaslaha inuu keeno shan engineer oo ajaaniib ah kuwaasoo magacyadooda iyo xirfadooda ay shirkaddu horey u gudbisay xiligii ay u tartamaysay mashruuca taasoo aan dhicin balse badalkeeda shirkaddu ka keentay wadanka UAE nin maamule ah oo la yiraahdo Cali Nuur Afrax halka ay shaqaale hoosena ay kasoo kaxaysatay xeryaha qaxootiga yemeniyiinta ee magaaladda Bosaso.
- **ICC**: Shuruudaha qandaraaska kuma qorneyn shardi qeexaya ingineerrada tiradooda, jinsiyaddooda inay ajnabi noqoto, nooca shahaado looga baahanyahay iyo inta sano khibradeed midnaba. Shirkadda ICC ayaa iskeed u go'aansatay in ay la timaado aqoonta iyo khibrada mashruuc noocaan ah u



- baahan karo si hawsha mashruucu habsami ugu fusho. Haddaba maxaa isbeddelay oo ingineerradii qandaraaska lagusooqoray u imaan waayeen?
- Ingineerkii ugu khibrada badnaa maamulkii hay'adda waddooyinka xilligaas joogay ayaa kabiyo diiday sababo aan caddeyn laheyn awgood.
 - Ingineerradii kale markii mashruucii saxiix loo waayey ayey iska kala shaqo tageen, Ingineer khibrad dheer leh shanbilood shaqo aan la hubin meel uma fadhiisto.
 - Waxaa markii mashruuca la saxiixay 5 bilood ka dib shirkaddu dib u raadsatay koox kale oo Ingineera ah, oo aan ka khibrad yareyn kuwii hore haddana Goobta Shaqada ayey ku sugan yihiin.
 - Maamulaha mashruuca ee lagu tilmaamay in imaaraadka laga keenay waa muwaadin Soomaliyeed oo dalka gudahiisa jooqey oo deegaanka u dhashay
 - Shaaqaalaha hoose ee lagu tilmaamay in laga soo qoray xeryaha qaxootiga waa 3 aqoonyahan oo khubara ah, iskudarka khibraddooduna kor u dhaafeyso 60 sano, waxaa wehliya khubara kale oo lagakeenay Kenya.
- Garowe ONLINE - waxay sheegtay in Dawladda Puntland ay doorkeedii gabtay, awood sheegashana hantidii mashruuca lagudhacayo, isla xisaabtankiina uu meesha kabaxay iwm
- **ICC:** Kooxda isu kaashatay in ay soo bandhigto xogta noocaan ah ha noqdeen xogbixiyeyaasha magacyadooda qariyey ama warbaahinta ay adeegsadeen waxaa kuwaajib ah in ay caddeyn keenaan ama markhati, haddii kalena waxay kusifoobayaan beenaalayaal fitnawadayaal ah, ALLA kacabsiguna kuyaryahay. Waxaa kamuuqata in ayna kubaraarugsaney in malaa'ig wax ka qoreyso qawlkodea iyo camalkooda labadaba, xataa haddii ay magacyadooda qariyaan, Haddii ay daacadnimojirto, habayaraatee, waxaa mudneyd in ay xusaan qodobbo kale oo ka muhiimad badnaa kuwa ay soo xusheen. Qodobadaas ay qolada xogtan sirta ah bixisay qariyeen iyagoo og waxaan kaxusilahaa 2 qodob oo kali ah sida hoos kuqoran:
- Tartankiin mashruuca wuxuu dhamaaday bishii November 2016 heshiisna lama saxiixin illaa April 2017. Maxaa loo fadhiyey oo la sugayey, yaana mas'uuliyaddaas lagala xisaabtamayaa?
 - Shuruudihii heshiiska kuxusnaa waxaa ugumuhiimsanaa design-kii (design & drawing documents) oo laga sugayey qandraas bixiyeyaasha PHA/GIZ in ay kusoo gudbiyaan 30 casho gudaheed, Sanad kabadan ayaa kasoo wareegtay saxiixii mashruuca welina lama soo wareejin oo waxaa laga sugayaa PHA iyo GIZ. Tanina waa kan ugu wayn oo sababay dib u dhaca mashruuca. waxaana mas'uulideeda lahaa maamulkii markaas umatalayey shaqada PHA/GIZ oo laga yaabo in been abuurkan ay waxkaqoreen.



Shirkadda Isxilqaan Construction Company oo ganacsato reer Puntland ah leeyihiin waxaa kago'an in mashruuca sida ugu tayada fiican loo fuliyo. Waxaa kago'an in ay adeegsato qalabka ugu casrisan ee adduunka laga isticmaalo iyadoo dadkii khibrada ulahaana ay joogaan.

Shirkadda Isxilqaan Construction Company waxay cidkasta oo jidkaas danaynaysa uxaqiijinaysaa in ayan waxaba kahagrandoonin uuna noqondoono mid kafiicnaada sidii loogu talagalay.

Ugu damayntii diinta islaamku waxay ina ku waajibsay in aan ilaalino shan arimood oo kala ah diinta, nafta, maalka, nasabka, iyo sharafta.

Sidaas darteed Shirkadda Isxilqaan Construction Company waxay udiyaar tahay in ay difaacdo sharafteeda iyo maalkeeda cidkasta oo kuxgudubtana ay sharciga latiigsan doonto iyadoo umaraysa habka sharciga.

Waxay kaloo shirkadda Isxilqaan u caddeyneysaa Dadweynaha in ay tahay been aan sal iyo raad toona lahayn qoraalkii ay Garowe Online ka qortay wadada isku xirta Garowe iyo Galkacyo, ujeedada ay kaleeyihiina ay ahayd in lafashiliyo Mashruucaas.

Allaa mahadleh

